Translated Test Directions
Online Test Administration Manual
Test Administration Script Supplement
Language: Somali

Bogga 48

10.1 Bilaabidda Qayb Imtixaanka ah

DHEH: Maanta, waxaad galaysaa Smarter Balanced [MAGACA IMTIXAANKA (NAME OF TEST) (sida, Imtixaanka Luuqadda Ingiriiska Fasalka 4aad Imtixaanka Ku Salaysan Awooda Shakhsiga ah (English Language Arts Grade 4 Computer Adaptive Test)] imtixaan. Waxaa lagu siin doonaa aqoonsi aad ku galayso qayb imitixaanka ka mid ah kaasoo aad isticmaalayso si aad u bilaabato imtixaanka. Ka hor inta aadan galin, aanu isla dulmarno qaar kamid ah qawaaniinta imtixaanka.

Waa in aad ka jawaabto su'aal kasta oo shaashadda saaran ka hor inta aanad ugudbin ta XIGTA (NEXT). Haddii aadan hubin jawaabta, dooro jawaabta aad isleedahay waa ay ugu saxsan tahay. Haddii aad jeclaan lahayd in aad dib u eegto jawaabtaas hadhow, calaamadee su'aasha si aad dib ugu eegto kahor inta aadan u gudbin su'aasha xigta. Dib ayaad ugu laaban kartaa waadna badali kartaa jawaabta inta lagu jiro imtixaanka.

Waxaad ku hakan kartaa halka aad doonto imtixaanka adiga oo dooranaya HAKI (PAUSE) halkii aad ka dooran lahayd TA XIGTA (NEXT) kaddib marka aad su'aal ka jawaabto. Fadlan gacanta taag haddii aad u baahan tahay codsona oggolaanshiyo kahor inta aadan dooran HAKI (PAUSE).

DHEH: Maanta, waxaad galaysaa Smarter Balanced [MAGACA IMTIXAANKA (NAME OF TEST) (sida, ELA Fasalka 4aad Imtixaanka ku Salaysan Awooda Shakhsiga ah (English Language Arts Grade 4 Computer Adaptive Test)] imtixaan. Waxaa lagu siin doonaa aqoonsi aad ku galayso qayb imitixaanka ka mid ah kaasoo aad isticmaalayso si aad u bilaabato imtixaanka. Ka hor inta aadan galin, aanu isla dulmarno qaar kamid ah qawaaniinta imtixaanka.

Waa in aad ka jawaabto su'aal kasta oo shaashadda saaran ka hor inta aanad ugudbin ta XIGTA (NEXT). Haddii aadan hubin jawaabta, dooro jawaabta aad isleedahay waa ay ugu saxsan tahay. Haddii aad jeclaan lahayd in aad dib u eegto jawaabtaas hadhow, calaamadee su'aasha si aad dib ugu eegto kahor inta aadan u gudbin su'aasha xigta. Dib ayaad ugu laaban kartaa waadna badali kartaa jawaabta inta lagu jiro imtixaanka.

Waxaad ku hakan kartaa halka aad doonto imtixaanka adiga oo dooranaya HAKI (PAUSE) halkii aad ka dooran lahayd TA XIGTA (NEXT) kaddib marka aad su'aal ka jawaabto. Fadlan gacanta taag haddii aad u baahan tahay codsona oggolaanshiyo kahor inta aadan dooran HAKI (PAUSE).

Bogga 49

DHEH: Jawaabahaagu waa in ay noqdaan kuwa adigu iskaa aad ula soo baxday. Fadlan indhahaaga haku eekaadaan imtixaankaaga oo hareeraha ha eegin xasuusnowna, in aan hadal la ogolayn. Haddii aad haysato teleefoonka gacanta, saacad casri ah, ama qalabka kale ee elegtoroonigga ah ee aan la oggolaanin, fadlan gacanta taag waana aan kaa qaadi doonaa kahor inta aanu bilaabmin imtixaanku.

Haddii aad imtixaanka dhammayso wakhti hore, fadlan gacanta taag iskana fadhi adiga oo aamusan.

DHEH: Hadda waxaan diyaar u nahay in aan galno. Marka aad gasho, waa in aad i sugto si aan u ansixiyo imtixaanka kahor inta aanad bilaabin. Waxaan xaqiijin doona in aad si sax ah u galisay aqoonsiga imtixaanka iyo macluumaadka kale.

Gali magacaaga koowaad ee sharciga ah, lama rabo naanaystaada, adiga oo ku xigsiinaya lambarkaaga SSID. Kaddibna gali aqoonsiga imtixaanka. Gacanta taag haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo ku qorista macluumaadkaan adigoo isticmaalaya kiiboorka.

Hadda dooro GAL (SIGN IN). Marka aad ku guulaysato inaad gasho, waxaad arki doontaa shaashad ay ku qoran yihiin magacaaga koowaad iyo macluumaad kale oo kugu saabsan. Haddii dhammaan macluumaadka shaashaddaada ka muuqdaa uu yahay mid sax ah, dooro HAA (YES) si aad hore ugu gudubto. Haddii wax kamid ah macluumaadku uusan sax ahayn, fadlan gacanta taag oo i tus waxa aan saxda ahayn.

Bogga 51

DHEH: Waxaad hadda arki doontaa shaashad ku weydiinaysa in aad hubiso waxyaabaha ku jira imtixaanka. Haddii dhammaan macluumaadku yahay mid sax ah, waxaad dooran kartaa HAA, BILAW IMTIXAANKAYGA (YES, START MY TEST). Haddii wax kamid ah aysan sax ahayn, fadlan gacanta taag.

[Waxa soo socda waa in kaliya loo akhriyaa imtixaanka ELA]

DHEH: Marka xigta waxa ay tahay inay kuusoo baxdo shaashad kugu boorinaysa in aad hubiso in codka kombuyuutarkaagu shaqaynayo. Gasho sameecadaha dhegaha waxaadna doorataa calaamadda makarafoonka ah ee goobada kujirta si aad codka u maqasho. Haddii aad codka maqasho, dooro HAA (YES). Haddaadan maqlin, gacanta taag.

DHEH: Kahor inta uusan imtixaanku soo bixin, waxaad arki doontaa bog casharo kujiraan oo taxaya waxyaabaha imtixaanka aad u isticmaalaysid iyo batoomada kuwaas oo laga yaabo inaad isticmaasho inta lagu jiro imtixaanka ama kasoo muuqan doona imtixaanka. Waxaad sidoo kale macluumaadkaan heli kartaa inta lagu jiro imtixaanka adiga oo dooranaya batoonka CAAWIMADA (HELP).

Marka aad diyaar u noqoto in aad imtixaanka bilowdo, dooro IMTIXAANKA BILAW HADDA (BEGIN TEST NOW) ee ku qoran xagga hoose ee bogga.

Bogga 52
Tilmaamaha Ardayga Inta lagu jiro Imtixaanka

DHEH: Waa muhiim in aad si wacan uga shaqayso imtixaanka. Ma u baahan tahay in aad imtixaanka hakiso oo aad nasato?

Bogga 53

DHEH: Inta ugu badan ee aad awoodo dadaal doorona jawaabta kuula eeg inay ugu macquulsan tahay. Haddii aadan hubin sida su'aal ay tahay in looga shaqeeyo, waxaad dib u eegi kartaa casharada kuu sharraxaya adiga oo dooranaya batoonka "i" ee ku yaala dhinaca midig ee shaashadda.

DHEH: Waxaa soo dhawaaday wakhtigii uu dhammaanaayay imtixaankani. Fadlan dib u eeg jawaabahaaga, oo ay kujiraan su'aalo kasta oo aad calaamadaysatay in aad dib ugu eegto. Ha gudbinin imtixaanka adiga oo aan ka jawaabin dhammaan su'aalaha.

[Waxa soo socda waa in kaliya loo akhriyaa qaybta ELA CAT]

DHEH: Haddii aad ka shaqaynayso su'aalo aad jawaabohooda kasoo saarayso qoraal, fadlan dhammaystir dhammaan su'aalaha qaybtaa kujira.

[Waxa soo socda waa in loo akhriyaa dhammaan imtixaanada]

DHEH: Haddii aad u baahan tahay wakhti dheeraad ah i ogeysii.

DHEH: Wakhtigii imtixaanku hadda waa dhammaaday. Haddii aadan dhammaystirin, dooro HAKI (PAUSE), waxaadna awoodi doontaa in aad dhammaystirto wakhti kale.

[Waxa soo socda waa in la akhriyaa qaybta Imtixaanka Ku Salaysan Awooda Shakhsiga ah (Computer Adaptive Test) kaliya haddii wakhtiga hakinta imtixaanku ka badan yahay 20 daqiiqo, tusaale ahaan oo kale, ardaygu inuu sii wato imtixaanka maalin kale]

DHEH: Xasuusnow, haddii aadan dhammaystirin aadna u baahan tahay in aad hakiso imtixaankaaga in ka badan 20 daqiiqo, ma awoodi doontid in aad dib ugu laabato su'aalaha kujira imtixaanka, oo ay kamidka yihiin su'aalaha loo calaamadeeyay dib u eegista. Sidoo kale ma isticmaali kari doontid wayaabihii aad ku qoratay Digital Notepad ka.

DHEH: Haddii aad ka jawaabtay dhammaan su'aalaha imtixaanka aadna dhammaystirtay dib u eegista jawaabahaaga, dooro GUDBI IMTIXAANKA (SUBMIT TEST). Hadda waxa aanu idinka ururin doonaa wixii waraaqo ah ee dheeri ah ama agabka kale.

[Waxa soo socda waa in loo akhriyaa qaybta su'aalaha fahamka ah ee ardayda sii wadanaysa imtixaanka maalin kale]

DHEH: Fadlan ku qor magacaaga waraaqda dheeraadka ah haddii aadan dhammaystirin su'aalaha fahamka ah. Waan idinka qaadi doonaa si loogu isticmaalo qaybta xigta ee imtixaanka.

DHEH: Haddii aad ka jawaabtay dhammaan su'aalaha imtixaanka aadna dhammaystirtay dib u eegista jawaabahaaga, dooro GUDBI IMTIXAANKA (SUBMIT TEST).

Hadda waxa aanu idinka ururin doonaa wixii waraaqo ah ee dheeri ah ama agabka kale.